XANNUUNKA IYO DHIIGISTA HORAANTA UURKA

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

Dhiigista uurka horaantiisa wuxuu noqon karaa mid dhib badan laakiinse had iyo jeer ma aha inaad dhicineyso. Wuxuu saameeyaa hal afartii dumaraba, oo kuwo badan oo ka mid ahi ay dhali doonaan ilmo caafimaad qaba.

Dhiigista uurka horaantiisaa

Haddii dhiigista ay keentay dhicintu, ma jirto wax daaweyn ah ama daawo oo ka joojin kara in dhicini aysan dhicin. Si kastaba ha ahaatee, weli aad ayey muhiim u tahay inaad aragto xirfadlayaasha caafimaadka. Haddii dhiigistu ay aad u culus tahay leedahayna xinjiro waaweyn oo ay la socoto xannuuno ku qabanayaan waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay daryeel degdeg ah. Haddii kale waxaad balan ka sameysan kartaa Dhakhtarkaaga Guud (GP) ama Adeega Qiimeynta hore ee Uurka.

Uurka ku samaysma meel kale (Ectopic) ayaa sidoo kale sababi kara xannuun iyo dhiigis. Tani waa marka uurku uu ku koraayo ilmagaleenka bannaankiisa- oo badanaa ah tuubada fallopian ka. Mid ilaa laba boqolkiiba dhammaan uurku waa meel qaldan la'aana uurka meesha qaldan wuxuu si daran u saameyn karaa caafimaadkaaga iyo dhalmadaada. Haddii aad isku aragtid xannuun daran aad ayey muhiim u tahay inaad aragtid xirfadle caafimaad.

Waxyaalaha kale ee sababa dhiigista hore

Badanaa, lama heli doono wixii dhaliyey uurkuna wuxuu u sii soconayaa si caadi ah. Marmarka qaarkood xirjirta dhiiga ee lagu arko ultrasound ka ayaa sheegi doonta inuu jiro waxoogaa dhiig ah hareeraha uurka, tan waxaa marmarka qaarkood laga dhigaa inay tahay dhiigitaanka abuuranka.

Waxyaalo kale oo sababa, oo aan wax shaqo ah ku lahayn uurka, ayaa sidoo kale laga yaabaa in la tixgeliyo; sida polyps yar, caabuq ama isbedelada cervix. Haddii dhiigistu ay sii socoto ama ay dib u soo noqoto ka dib iskaanka uurka ee caadiga ah, waa muhiim in lagaa baadho sababo kale oo suurtagal ah.

Dhiigista hore ee aan horseedin dhicinta umay keenteen ilmahaaga wax dhibaato ah.

Baadhitaanada dhiigista ee uurka hore

Markaad booqatid GP-ga ama Adeega Qiimeynta Uurka Hore, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo mid ama dhammaan baaritaanada soo socda.

Baaritaanka gudaha

Dakhtar ama kalkaaliso ayaa laga yaabaa inay sameeyaan baaritaan si ay u arkaan haddii:

- Ilmogaleenku yahay xajmiga laga fileyo iyadoo la eegayo heerka uurkaagu marayo
- Waxaa jiri kara sabab kasta oo keeni karta dhiigis
- Waxaa jira sabab kasta oo muuqata oo keentay dhiigista sida caabuqa ama afka ilmagaleenka oo furan (qoorta ilmogaleenka). Baaritaano dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loo baadho caabuqa.

Sawirka Ultrasound

Ka dib qiyaastii lixda toddobaad ee uurka garaaca wadnaha ilmaha badanaa waxaa lagu arki karaa ultrasound. Haddii aad dhiigeysay markaad uurka lahayd waxaa badanaa lagugu samaynayaa ultrasound ka ferjiga sababtoo ah wuxuu siinayaa aragtida ugu fiican ee suurtagalka ah ee uurkaaga. Ultrasound-ka ferjiga waa dhuuban yahay waxaana la geliyaa ferjigaaga gudihiisa. Waxaad dareemi doontaa inuu la mid yahay baaritaanka gudaha aad buuna ammaan u yahay. Lix toddobaad ka hor, uma badna in ultrasound uu bixin karo jawaab go'an, laakiinse waxaa laga yaabaa inuu caawimaad badan yahay haddii wax saluug ahi jirto in uurkaagu yahay meel aan caadi ku abuurmay.

Baadhitaanada dhiiga

Baadhitaanada dhiiga waxaa loo sameeyaa si loo cabiro haddii heerka hoormoonka uurku (HCG) ku haboon yahay heerka uu uurkaagu marayo (iyadoo ku salaysan wakhtiga caadadaadii ugu danbeysay). Badanaa baaritaanka waa in lagu celiyaa si loo jeegareeyo haddii heerarka hormoonka ay si caadi ah kor ugu kacayaan. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad u baahatid baaritaan dhiig si loo jeegareeyo nooca dhiigaaga.

Maxaan sameeyaa intaan sugayo natiijada?

- Iskuday, ilaa inta suurtagalka ah, inaad nasato oo aad isdejisid.
- Sii wad, ilaa intaad ka awoodid, inaad sameysid waxqabadkaagii maalmeed, oo ay ku jiraan shaqo haddii aad rabtid. Waxqabadka caadiga ah, ee aan xoog aada u baahneyn, wax dhib ah oo badan ma leh.
- Haddii xannuun uu ku qabto waxaad qaadan kartaa barsatamool (sida baanadool) sida waafaqasan tilmaamaha ku qoran baakada.
- Ha'yado badan ayaa ku taliya inaad iska ilaalisid isticmaalka tampon markaad dhicineyso ama ka dib ama laga yaabo dhicin. Tani sababtu waxaa weeye suurtagalnimada khatarta caabuqa, inkastoo tampons aan la xaqiijin inay sababaan caabuq xaaladan oo kale.
- Dadka badidiisu waxay doorbidayaan inay iska ilaaliyaan galmada haddii uu jiro xannuun ama dhiigis. Isla marka dhiigu uu joogsado, waa hagaag inaad galmo sameysid haddii aad rabto inaad samayso. Dadku badanaa waxay dareemaan walaac galmo sameynta xaaladahan oo kale, laakiinse ma rumeysnin inay wax isbedel ah u keeneyso khatarta dhicinta.
- Haddii baadhitaanada aan wax go'aan ah laga gaari karin, waa suurtagal in dhicintu ay dhaceyso intaad sugeysid baaritaano dheeraad ah. Haddii aad isku aragto dhiigis xoog badan oo leh xinjiro iyo xannuun ku qabanaya marba, waxay u egtahay inaad dhicineysid. Dhiigista, xinjirowga iyo xannuunku badanaa way degi doonaan marka unugyada uurka oo dhammi ay soo dhacaan ama baxaan. Marmarka qaarkood dhiigista culisi way sii soconaysaa waxaana laga yaabaa inaad hesho daaweyn dheeraad ah. Waa inaad aragtaa dhakhtar ama aadaa waaxda gargaarka degdega ah wixii jeegareyn ah haddii aad u maleynaysid inaad dhicisay ama aad dhicineyso.

Waa inaad u tagtid Waaxda Gargaarka degdega ah ee kuugu dhow haddii aad isku aragtid:

- dhiigis ka sii xoog badan, tusaale ah qoynaysa laba faashadood saacadiiba iyo/ama dhigaya xinjiro xajmigoodu le'eg yahay kubada golf ka
- xannuun daran oo ah uurku-jirta ama garab xannuun
- qabow ama xumad
- suuxid ama wareer
- ur aan caadi ahayn iyo wax ka yimaada ferjiga.

Fahmida natiijadaada

Heerarka hormoonka uurka

Heerka hormoonka uurka ee dhiigaaga ku jira wuu isbedeli doonaa iyadoo ku xiran inta toddobaad ee aad uurka lahayd. Marka laga baqayo in dhicini timaado, heerarka hormoonka ayaa dhacaya. Kuwan soo socda ayaa sharxaya waxa heerarka kala duwan micnahoodu uu noqonayo.

1. Heerarka hormoonka uurku waa caadi
Waa wax kuu xaqiijinaya in heerka hormoonka uurkaagu uu caadi yahay, laakiinse ma xaqiiineyso in uurkaagu uu si caadi ah u korayo. Heerka hormoonkaaga uurka waxa lala eegayaa astaamahaaga si ay nooga caawiso inaan go'aansano markaan sameyn doono ultrasound. Haddii ultrasound la sameeyo horaanta hore ee uurka waxaa laga yaabaa in aanaan arag in nagu filan oo aan ku gaarno gunaanadka ku saabsan uurka.

2. Hormoonka uurku wuu ka hooseeyaa intii laga filayey
Tan micnaheedu wuxuu noqon karaa laba waxyaalood:

- waxaa laga yaabaa in uurkaagu uusan ahayn toddobaadada badan ee aad u maleysay inaad lahayd; ama
- uurku uma korayo sidii caadiga ahayd.

Badanaa baaritaan dhiig ayaa loo baahanayaa laba maalmood ka dib.

3. Hormoonka uurka wuxuu kor ugu kacayaa si gaabineysa marka loo eego sida caadiga ah
Taas micnaheedu waxay noqon kartaa inay tahay in uurku uusan u koreynin si caadi ah, sababahan midkoodna laga yaabo inaad u dhicineyso ama uurka ayaan booskiisu caadiga ahaa joogin. Marmarka qaarkood in kastoo laga yaabo inay tahay qaabka hormoonka aan caadiga ahayn ama aanu ahaynba uur caadi ah sidiisii.

4. Hormoonka uurka ayaa hoos u dhacaya
Tan micnaheedu badanaa waxaa weeye uurkii ayaa dhamanaya.

Baaritaanka Ultrasound

1. Ultrasound ka caadiga ah ee leh wadne garaac
Kani waa war wanaagsan. Dhicintu waa wax aan caam ahayn tan ka dib; labaatankiiba waa wax ka yar hal. Waxaad sii wadan kartaa daryeelka uurka caadiga ah. Baaritaanka jeegareynta qoorta ilmagaleenka (CST) ayaa lagu talinayaa haddii mid wakhtigiisii la gaaray ama haddii dhiig qaadistaadu ay sii socoto.

2. Ultrasound wuxuu muujinayaa dhicin dhab ah
Waxaa jira tiro calaamado ah, oo lagu arki karo ultrasound-ka, oo noo sheegaya inuu uurku joojiyey koritaankii. Tan waxaa ka mid ah xajmiga meeshu intay le'egtahay uu ilmuhu ku abuurmayo, xajmiga ugxan sidaha iyo wadne garaacis la'aanta. Marmarka qaarkood waxaan arki karnaa in dhicinta ay dhowaanba bilaabatay oo qaar ka mid ah unugyada uurku ay ka soo baxeen ilmogaleenka. Waxaa laga yaabaa inaad u baahatid inaad ka fekertid doorasho daaweyneed oo hubineysa in dhammaan unugyada uurku ay soo baxeen laakiinse tani badanaa degdeg maaha.

3. Ultrasound wuxuu muujinayaa meesha uurka ilmuhu uu ku jiro oo yar laakiinse ma leh wax koritaan ah ama wadne garaac.
Goobta yar ee ilmuhu uu ku jiro waxay micnaheedu noqonayaa:

- weli waa uurka horaantiisa hore in la arkaa uurjiifta; ama
- uurku si habsami ah uma korayo.

Haddii uurka meesha ilmuhu uu ku jiro ay xajmiga aan ka fileyno heerkan uurkaaga oo ay la mid tahay heerarka hormoonka uurkaaga, waxaad sii wadi kartaa daryeelka uurkaaga caadiga ah.

Haddii meesha ilmuhu uu ku jiro ee uurku aysan xajmigii saxda ahaa ahayn, waxaa laga yaabaa inay noqoto sababtoo ah uurkaagu ma gaarsiisneyn sidii aan u maleynay. Sida kaliya ee tan lagu xaqiijin karaa waxaa weeye in wakhti inuu ka soo wareego aad u ogolaato oo lagu celiyo sawirka ultrasound ka. Sawirka ultrasound badanaa waxaa lagu sameeyaa qiyaastii ilaa toban maalmood wuxuuna xaqiininayaa inuu uurku korayo iyo in kale.

Nasiib daro, ma jiro si ka dhakhso badan oo lagu ogaan karo, waxa laga yaabo inuu ku dhaco uurkaaga ama aan ku dhicin. Marmarka qaarkood dhiigis dheeraad ah ama dhicin ayaa dhacaysa inta lagu jiro wakhtiga aad sugeysid sawirka ultrasound labaad.

4. Sawirka Ultrasound wuxuu muujinayaa in ilmagaleenku uu madhan yahay
Tan micnaheedu waxaa weeye:

- weli waa wakhti hore in la arkaa uurka
- waxaa dhacay dhicin dhammeystiran dhammaan unugyada uurkuna waa soo baxeen ama dhaceen (khaas ahaan haddii uu jiray dhiigis xoog badan) waxaa laga yaabaa inuu uurku booskiisii uusan ku jirin oo yahay "ectopic", oo uu ku korayo ilmogaleenka bannaankiisa. Uurka ectopic ma sii wadi karo inuu si caadi ah u koro wuxuuna ku danbeeynayaa dhiigis daran oo gudaha ah haddii aan la daaweyn.

Haddii ilmo galeenku uu madhan yahay, baadhitaano dheeraad ah ayaa loo baahanayaa ilaa aan ka hubno inuusan uurku ahayn mid aan booskiisii ku koreyn ama ectopic ah ama dhicinta laga xaqiijiyo. Badanaa waxaa lagaa qaadayaa baaritaan kale oo dhiig si loo cabiro wixii isbedela ah ee ku yimid heerarka hormoonka uurkaaga. Baaritaanadaada dhiiga waa lala wada eegayaa wixii isbedelo ah xannuunka iyo dhiigista si loo go'aamiyo haddii iyo marka daaweynta loo baahan yahay ama haddii uu caawimaad badan keenayo sawirka ultrasound-ka oo dheeraad ah.

5. Sawirka Ultrasound wuxuu muujinayaa uurka oo aan booskiisii ku abuurmin.
Haddii la helo uurka oo aan booskiisii ku abuurmin waxaa laga yaabaa inaad uu baahato daaweyn degdeg ah si looga hortago dhibaatooyin kale. Waxaa jira laba doorasho oo daaweyneed iyadoo ku xidhan xaalada uurka aan booskiisii ku abuurmin. Waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in qaliin la sameeyo si loo soo saaro uurka aan booskiisa ku sameysmin (ectopic) ama marmarka qaarkood waxa lagu daaweyn karaa daawo soo ururinaysa.

Xaggee baan ka heli karaa taageero intaa ka sii badan?

Waa caadi inaad dareentid dhib ama aad ka xumaatid haddii aad dhiigeysid ama xannuun ku hayo intaad uurka leedahay. Dumarka qaarkood waxay u arkaan inay caawineyso haddii ay doontaan la talin iyo wixii taageero ah ee kale nafsadeed ama maskaxeeedba. Weydii GP-ga wixii uu kugula talinayo ee meeshaad degan tahay ah.

Wax go'aan ah kama gaarin uurka sii wadidiisa

Dumarka qaarkood, dhiigis iyo xannuunka hore ayaa wuxuu noqon karaa calaamadaha ugu horeeya inay uur leeyihiin. Aqbalka inaad uur leedahay adoo la qabsanaya inuu ilmuhu kaa soo dilmo waa wax wareer leh. Haddii aadan hubin sii wadida uurkaaga, waa inaad kala hadashaa GP-gaaga ama xirfadle kale oo caafimaad.

Yaan wixii caawimaad ah kala xiriiraa?

Doorashooyinka xiriirka guud

- Dhakhtarkaaga xaafada (GP)
- Adeega caafimaadka bulshada
- Waaxda xaalada degdega ah ee isbitaalka kuugu dhow
- Adeega qiimeynta uurka hore ee kuugu dhow
- Kalkaalisda laga waco -1300 60 60 24

Fursadaha Isbitaalka Durmarka ee Royal

Wixii daaweyn, baaritaan iyo qiimeyn ah

- Adeega Qiimeynta uurka Hore (EPAS)

  T: (03) 8345 3643

  Jimcaha ilaa Isniinta laga bilaabo 8.00 subaxnimo to 3.00 galabnimo.

  Wac lambarka kore si aad ballan u sameysatid. Waxaa laga yaabaa inaad faahfaahin kaga tagtid mishiinka jawaabaha laakiinse qof baa dib ku soo wici doona. Keen wixii macluumaad ah iyo natiijada baaritaanada uurkan markaad timaadid.

- Xarunta Xaalada degdega ee Dumarka (24 kii saacadood) Kaalay wakhti kasta haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah.

  Sawirka Ultrasound wixii dhicin suurta gal ah, haddii loo baahdo, badanaa waxay u baahan doontaa in laguu ballamiyo rugta caafimaadka EPAS ee ku xigta ee la helayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah

- Xarunta Soo dhoweynta Dumarka

  T: (03) 8345 3037 ama lacag la'aanta ah 1800 442 007 (goobaha degmooyinka)

  kala xiriir Xarunta wixii caawimaad ah ee ka helida macluumaadka tayada leh internetka.

Wixii ah taageerada dareenka maskaxiyanka ah ama qof aad kala hadashid sidaad dareemeysid

- Adeegyada Taageerada Bulshada ee Dumarka
  T: (03) 8345 3050 (saacadaha xafiiska)
- Adeegyada Diimeed iyo Daryeelka Wadaadada
  T: (03) 8345 3016 (saacadaha xafiiska)

Haddii aadan go'aansan sii wadida uurka

- 1800MyOptions
  T: 1800 696 784
  W: www.1800myoptions.org.au

  1800MyOptions waxay bixiyaan macluumaad qarsoon oo la xiriira fursadaha uurka iyo adeegyada; waxay kaala hadli karaan fursadahaaga waxayna hubinayaan inay kuu diraan adeegyada kugu haboon wax alaale wixii aad go'aansato.

AFEEFTE Xaashidaan xaqiiqada waxay bixisaa macluumaad guud keliya Tala mucayina oo ku saabsan ilmahaaga ama baahida daryeelka caafimaad, waa inaad raadisaa talada aqoonyahanada caafimaadka Isbitaalka Royal Women's Hospital ma aqbalo wax masuuliyad ah oo lumitaan ama khasaaro ah oo ka timaada ku tashiga xaashidaan halkii aad ka arki lahayd aqoonyahan caa imaad. Haddii ilmahaaga yari u baahan yahay ka warhayn caa imaad oo degdeg ah la xiriir qaybta xaalladaha degdegta ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2020